**Xeer – Sharci 20 Agoosto 1958, lamba. 3 diw.**
**Wax-ka-beddeka Sharciga 25 Juunyo 1958 lamba. 15**
**Doorashooyinka Maamullada**

**MAAMULUHU**

Markuu tixgeliyey baahida iyo degdegsiimaha loo qabo in lagu dhaqaaqo wax-ka-beddelidda Sharciga 25 Juunyo 1958 lamba. 15 "Doorashooyinka Maamullada";

Markuu Dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Ayada oo lagu Saleynayo Soojeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha;

Asaga oo cuskanaya awoodaha uu siinayo qodobka 8aad, ee Amargooyada 5ta Jannaayo 1956, lamba. 2;

**WUXUU XEERAYAA**

**Qodob-kaliyaale**

Qodobada 7, 10, 11, 27, 28, 31, 33, 35, ee Sharciga 25 Juunyo 1953, lamba. 15 "Doorashooyinka Maamullada waxaa lagu beddela kuwa soo socda:

**Qod. 7**

**Shuruudaha codbixiyeyaasha**

Waxaa codbixiyeyaasha Golaha Dowladda Hoose ah muwaadiniinta soomaaliyeed, lab iyo dhedigba, kuwaasoo;

— ku qoran diiwaannada qaybta qoriska dadka, ee Dowladda Hoose, ugu yaraan lix bilood ka hor taariikhda maalinta sagaashanaad ee ka horreysa doorashooyinka: xagga dadka ka soo hayaamay (guuray) maamul munishiibiyo oo kale waxaa ku filan isqorista taariikhda maalinta sagaashanaad ee ka horreysa doorashooyinka;

— gudaha sanadka la qabanayo doorashooyinka gudahiisa in uu buuxiyey dáda 18 sano;

— aan ahayn dad dhantaalan, waalan ama laga awoodtiray xafiisyada Guud (dowladda);

— aan ku jirin xabsi (xaalad xirnaansho ah).

**Qod. 10**

**Cabashooyinka la Xiriira Liisaska guud, ee Codbixiyeyaasha**

Ugu dambayn maalinta lixaad ee ka horreysa doorashooyinka, Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu arko liisaska guud ee cod-bixiyeyaasha lagu xareeyay, sí waafaqsan qodobka hore iyo inuu ka qaato cabash (rafcaan) ka dhan ah diiwaangelinta ama ka-baaqsiyada: waa in la soo bcabashooyinkaas waa in la gudbiyaa (geeyaa) inta lagu jiro maalinta ka dambeysa maalinta lixdamaad oo horey loo soo sheegay.

"Ayaga" cabashooyinka derejada kowaad waxaa xallinaya Gudoomiyaha Degmada, kaas oo ay tahay in lagu hagaajiyo cinwaankiisa, yada oo ku qoran warqad caadi ah, góaanna ka gaaraya, asaga oo dhegeystay Duqa Magaalada. Gudoomiyaha Degmadu waa inuu goaan ka gaaro, inta lagu jiro, maalinta kontonaad ee doorashooyinka ka horreeya: haddii uu go'aan gaarwaayo, cabashada waxaa loo qaadanayaa in ay tahay mid la aqbalay. Go'aanka ama go'aanka la'aanta Guddoomiyaha Degmada, muwaaddinka ay qusayso ama Duqa Magaalada, shan maalmood gudahood wuxuu cabasho uga qaadan karaa Garsooraha Degmadda, kaas, inta lagu

jiro maalinta afartanaad ee ka horreysa doorashooyinka, ay tahay inuu gaaro go'aan aan racfaan laga qaadan karin. Haddii ay dhacdo in Garsooraha Degmadu aanu go'aan ku gaarin muddada la gooyey: rafcaanka waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay mid la aqbalay.

## Qod. 11

## Tirada iyo liisaska goobaha codbixinta iyo caddeymaha doorashooyinka

Inta lagu jiri maalinta saddex iyo tobnaad oo ka horreysa doorashooyinka, Duqa Magaalada waa inuu:

dejiyee (gooyo) tirada goobha doorashooyinka, oo ku cabbiran wax aan ka badnatn 500 codbixiyeyaal goobti degaan doorashaba, oo munishiibiyooyinka heerka C iyo D oo codbixiyeyaashu aysan ka badnayn 400, goob degaan doorasho, oo, wixii ka baxsan xogaha lagu tilmaamay qodobka 8aad, waa in ay leeyihiin meelo lagu talagay, oo loo gaar yeelay waxa ay ka kooban yihiin goobaha codbixinta, ee loogu talagalay xusuus-qoridda ikhtisaas;

buux-buuxiyo caddeymaha (shahaadooyinka) doorashooyinka;

ogeysiiyo Wasiirka Arrimaha Gudaha, Guddoomiyaha Gobolka, Guddoomiyaha Degmada tirada iyo dhismooyinka ay dhacaan goobaha doorashooyinka iyo weliba tirada codbixiyeyaasha loo qoondeeyey goob kasta oo doorasho.

## Qod. 27

## Fulinta lala soo Daahay iyo Liisaska dib-loo-celiyey - Cabashooyin

Haddii waqtiga la gudbinayo liisaska musharrixiinta ay caddaato inaan la fulinin shuruudaha ku xusan qodobada hore, Guddoomiyaha Degmada ama shaqsi uu u igmaday, iyadoo la raacayo qodobka 26aad, ayaa dadka ay khuseyso u qabanaya muddo shan maalmood ah; ka dib markii ay dhammaato muddadan, ayaa waxaa lagu dhawaaqayaa in la diiday liiska.

Ka soo-horjeedka aqbal la'aanta liiska musharixiinta ama ka soo horjeedka go'aamada, la xiriira, isla góaanka Guddoomiyaha Degmada ama qofka uu u igmaday, wakiillada saxiixayaasha, ee lagu sheegay faqradda ugu dambeeya ee qodobka. 22aad, waxay cabasho qoraal ah u soo bandhigi karaan qaalliga (garsooraha Maxkamadda Degmada) inta lagu gudajiro maalinta shan iyo afartanaad oo ka horreysa doorashooyinka. Garsooraha Maxkamadda degmadu waa inuu cabashada góaan-ka-gaaraa, inta lagu gudajiro maalinta afartanaad oo ka horreysa maalinta doorashooyinka. Haddii ay dhacdo inuusan go'aan ku gaarin muddadan gudaheeda, cabashada waxaa loo qaadanayaa in ay tahay mid la aqbalay.

## Qod. 28

## Nuqullada Liisaska

Inta lagu jiro maalinta ka horreysa doorashooyinka, Guddoomiyaha degmada waxa uu u gudbinayaa Wasiirka Arrimaha Gudaha, Guddoomyaha Gobolka, garsooraha Maxkamadda Degmada iyo Duqa Magaalada, nuqul ahaan, liisaska musharraxiinta oo la qabtay, oo loo arkay in ay sax yihiin, loo lambariyey sida loo kala hor-qabtay, oo ay wehliyaan astaamaha ay kala leeyihiin, ayada oo sidoo kale la hubinayo tirada guud, ee codbixiyeyaasha iyo goobaha codbixinta iyo dadka u idman in ay cayimaan wakiillada liista kasta.

**Qod. 31**

**Goobaha Doorashooyinka**

Goobaha doorashooyinka waxa ay ka kooban yihiin hal guddoomiye iyo laba tiriyeyaal, kuwaas oo kan ugu dáda weyn uu qabanayo xilka Ku-xigeen Guddoomiye.

Goob kasta oo codbixin waxa ay yeelanaysaa (leedahay) hal xoghaye.

Guddoomiyaha iyo tiriyeyaasha waxaa laga dhex dooranayaa codbixiyeyaasha, Xoghayaha waxaa laga dhex dooran karaa dad aan ka mid ahayn codbixiyeyaasha.

Dhammaan waxaa magaabaya, ayada oo lagu saleynayo soojeedinta Duqa Magaalada, Guddoomiyaha Degmada, kaas oo sameynaya xataa wixii beddelaaddooda ee lagama maarmaan ah.

**Qod. 33**

**Xafiisyada Doorashooyinka ee Degaan-Doorasho**

Xafiiska degaan-doorasho waxa uu ka kooban yahay Guddoomiyaha, laba Xubnood iyo hal Xoghaye.

Waxaa xafiiska kor lagu soo sheegay ka tirsan xataa laba qof oo u qaybsan xisaabinta tirooyinka (lambarrada).

Guddoomiyaha iyo Xubnaha waa in ay yihiin codbixiyeyaal; Xoghayaha iyo u-qaybsanayaasha tirada waxa ay noqon karaan xataa dad aan codbixiyeyaal ahayn.

Dhammaan waxaa magacaabaya, ayada oo lagu saleynayo soojeedinta Duqa Magaalada, Guddoomiyaha Degmada, kaas oo sameynaya xataa wixii la xiriira beddelkooda oo lagamamaarmaan ah.

Wixii beddelid ah oo lagama maarmaan noqda waxaa sameyn kara xataa qofka loo wakiishay, ee ku xusan qodobka 26aad.

**Qod. 35**

**Khasabnimada xilalka, OGEYSIISYADA iyo Dhaarta**

Xilalka ku xusan cinwaankan waxa ay leeyihiin dabeecad khasabnimo. Qofna lagama dhaafi karo haddii ayan jirin sababo aan laga fursan karin oo la caddeeyey. Magacaabista waa in la sameeyo lana ogeysiiyo dadka ay khuseyso, ugu yaraan toban maalmood ka hor maalinta loo qabtay (gooyey/cayimay) doorashooyinka.

Ka hor inta uusan qabanin xilka xubin kasta, ee goob-codbixin ama xafiis doorasho waa in ay/uu martaa, qaab rasmi ah, qaalliga (Garsooraha Maxkamadda Degmada) ama Garsooraha Maxkamadda Gobolka, dhaarta soo socota:

«Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan ku fulin doono howlaha doorashada ee la igu aaminay damiir, daacadnimo iyo xushmadda sharciga ee ugu taxaddarka badan».

Xeerkan – Sharci waxa uu dhaqagelayaa laga bilaabo 20ka Agoosto 1958 waxaana la geynayaa Golaha Xeerdejinta, sí uu ugu rogo (beddelo) sharci ugu dambeyn bilowga kal-fadhiga ku xiga taariikhda la nashriyo.

Muqdisho, 20ka Agoosto 1958
P. Maamulaha
**Pernardelli**

Wasiirka Kowaad
**Cabdullahi Ciise Maxamuud**

P. Wasiirka Arrimaha Gudaha
**Cabdullahi Ciise Maxamuud**
Waa arkay waana diiwaangeliyey- Diiw. lamba. 11, xaashi lamba. 172.
Hantidhowraha: Spadaro